| CIWAANKA XEERKA/HABRAACA: **Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha** | |
|---|---|
| **SHIRKADA:** ☒ CMHC ☒ CMMC ☒ CMMG<br>☒ BRIDGTON HOSPITAL ☒ RUMFORD HOSPITAL<br>☒ BOLSTER HEIGHTS ☐ RUMFORD COMMUNITY HOME<br>☒ ELSEMORE DIXFIELD DAWADA QOYSKA ☒ SWIFT RIVER FAMILY MEDICINE | |
| **QAYBTA:** Maamulka | **TAARIIKHDA HORE:** 11/29/2019 |
| **KOOXDA LEH:** **Mareegta Dakhli aruurinta** | **TAARIIKHDA DAABACAADA: 9/1/2023** |

**XAJMIGA**

Xeerkaan waxa uu qabanayaa dhammaan xarumaha, shaqooyinka, shirkadaha, iyo adeegyada Shirkada Daryeelka Caafimaadka ee Bartamaha Maine (Central Maine Healthcare Corporation, "CMH") iyo dhammaan shaqaalaha CMH.

**UJEEDADA**

Central Maine Healthcare (“CMH”) waxay caawimaad dhaqaale siisaa adeegyada degdega ah iyo kuwa caafimaad ahaan muhiimka ah oo lagu bixiyay goob bukaan socod ama bukaan jiif oo lagu baxshay qaab cadaalad ah, siman, qadarin leh oo higsi leh lana siiyay bukaannada aan lahayn caymiska ama aan caymis ku filan haysan. Bixinta caawimaad dhaqaale waxay waafaqsan tahay, ku habboon tahay ayna muhiim u tahay buuxinta shaqadeena, yoolkeena iyo mabaadii'deena. Xeerkaan waxa uu ka hadlayaa Caawimaada Dhaqaalaha wuxuuna taageerayaa dadaalka CMH ee bixinta helitaanka daryeelka badqabka leh, la isku halayn karo, tayada badan oo la siinaayo bukaan kasta, maalin kasta.

**QEEXITAANNADA**

**Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka (AGB):** Cadadka Caadiyan Laga Qaado Bukaanka ee daryeelka degdega ah ama kuwa kale ee caafimaad ahaan muhiimka ah lana siiyo dadka haysta caymiska caafimaadka ee daryeelkaas daboolaaya. Illaa heerka ku habboon, AGB ayaa lagu go'aamin doonaa qaabka "raad-raaca" ayadoo la qaadanaayo dhammaan lacagta isbitaalku ka helay dhammaan qorshayaasha ganacsiga iyo Medicare intii lagu jiray sanad miisaaniyadeedkii hore ee isbitaalka kadibna loo qaybinaayo tiradaan qarashaadka guud ee laga qaaday caymisyadaas ganacsi iyo

Medicare intii lagu jiray sanadkaan hore.  Bukaanada u qalma kaalmada waxay heli doonaan lacag dhimista u dhiganta ama ka badan lacag dhimista la siiyay shakhsiyaadka caymiska ku jira. Boqolkiiba AGB hoos ku qoran waxay codsadaan gurmad kasta ama daryeelka caafimaadka lama huraanka ah ee la siiyo shakhsiga u qalma FAP ee taariikhda oggolaanshaha xeerkan.

| Cusbitaalada Xubinta ka ah | Central Maine Medical Center | Rumford Hospital | Bridgton Hospital |
|---|---|---|---|
| AGB % | 45.0% | 51.2% | 50.3% |
| Lacag dhimista % Loo baahan yahay | 55.0% | 48.8% | 49.7% |
| Lacag dhimista % La bixiyay | 55.0% | 55.0% | 55.0% |

**Muddada Codsiga:**  Muddada Codsiga ee Caawimaada Dhaqaalaha ee taariikhda adeegyada labaxshay ayaa dhacaysa sideed billood (240 maalmood) kadib laga bilaabo cadaynta koobaad ee biilka kadib qarashka.  Caymiska mudadaan codsiga ee Caawimaada Dhaqaalaha ayaa daboolaysa lagasoo bilaabo lix billood (180 maalmood) kahor cadaynta koobaad ee lacagta qarashka marka lagu yeesho kadib ama taariikhda adeegyada la bixiyay ee ku cad caddaynta biilka – hadba kii horeeya – illaa lix billood kadib taariikhda codsiga.  Adeegyada bukaan jiifka ka dib xogta go'aanka hore ee u baahan codsiga la cusboonaysiiyay .

**Talaabooyinka Lacag Aruurinta ee Qayru Caadiga ah (ECAs):** Talaabooyinka soo socda ee ka dhanka ah qof, ama ka dhanka ah qof kale oo aqbalay ama laga doonaayo inuu aqbalo masuuliyada qarashka isbitaalka ee daryeelka qofka, lana xariira qaadista lacagta biilka daryeelka ee ku cad barnaamijka FAP: (i) ka iibinta daynta qofka qolo kale; (ii) u sheegida warbixinta xumaanka ee qofka wakaaladaha soo sheega dadka daynta bixin waaya ama laanta daynta; iyo (iii) talaabooyin u baahan hanaan sharci ama garsoor (tusaale, in lala wareego guriga qofka, qaadashada hantida qofka, in la jarto mushaarka qofka).

ECAs **kuma jiraan** in isbitaalku damaanad u qaato guryaha qofka si uu u helo dacwada xalinta daynta, xukunka, ama caqabadaa ka imaanaaya dacwada bukaanka ee ka dhanka ah qolo saddexaad oo dhalisay dhaawacyada gaaray bukaanka.

ECAs sidoo **kuma jiraan** iibinta isbitaalku daynta qof ka iibsho qolo saddexaad haddii, kahor intaan iibka la samayn, isbitaalku uu la galo heshiis qoraal ah oo sharci ah iibsadaha daynta kaasoo leh afar shardi:

- Iibsadaha dayntu waa inuu aqbalaa sameeyo ECAs kasta si uu lacagta daynta usoo xareeyo;
- Iibsadaha dayntu waa inuu aqbalaa inuusan saaran dulsaar daynta taasoo ka badan qiimaha saxda ah ee ku jira Qaybta 6621(a)(2) ee Xeerka Dakhliga Gudaha xiliga daynta laga iibshay (ama qiimaha dulsaar kale oo lagu caddeeyay ogaysiiska ama tilmaanta kale ee lagusoo saaray Tilmaamaha Dakhliga Gudaha);
- Daynta waa inuu celin karaa ama dib u celin karaa isbitaalku marka isbitaalku ama iibsaduhu go'aansho in qofku u qalmo FAP; iyo
- Haddii la go'aansho inuu qofku u qalmo FAP aana daynta la celin ama uusan ka laaban isbitaalku, iibsaduhu waa inuu raacaa habraacyada lagu cadeeyay heshiiska oo xaqiijinaaya inuusan qofku lacag bixin, aysan wax masuuliyad lacageedna saarnayn, iibsadaha iyo isbitaalka si wadajir ah ayaa in ka badan qofka si gaar ah masuul uga ah inay lacagta ka

baxshaan qofka FAP u qalma. ECAS sidoo kale kuma jiraan ku dirista sheegashada hanaanka dalaafka dhaqaale.

**Qaliinka Ikhtiyaariga ah ee Qurxinta:** Buug Gacmeedka Isbitaalka ee Medicare ta CMS, Qaybta 250.11. Qaliinka isqurxinta waxaa ku jira hanaan kasta oo qaliin oo loogu talagalay qurxin muuqaalka, marka laga reebo in loogu baahan yahay dayactir degdeg ah (tusaale, isla marka uu caafimaad ahaan muhiim noqdo) ee dhaawaca shilka ama hormarinta shaqada xubin jireed oo qaloocatay.

**Daryeelka Xaalada Degdega ah:**

- Qofka ayaa imaanaaya Waaxda Xaalada Degdega ah ("ED") waxaana la codsadaa in la baaro ama laga daaweeyo xanuun kasta oo caafimaad; ama
- Bukaanka waxaa lagu daaweeyaa waax ama shaqo lagu sameeyo meel bulshada u furan (magac ahaan, boorar lasoo dhajiyay, xayiisiin, ama qaabab kale) oo ah meel bixisa daryeelka xaalada Caafimaad ee Degdega ah oo ah kuwo degdeg ah ayadoon loo baahan balan horay loo qabsaday (tusaale, xarunta daryeelka Degdega ah, qaybta banaanka xarunta ee Foosha iyo Umulinta, iwm.).

**Qoyska:** Qoys waa koox labo qof iyo ka badan ka kooban oo isla dhashay, isqaba, ama ilmo la korsaday ah kuwaas oo isla dagan ayna jiraan qaar kamid ah ayaga oo ay saaran yihiin masuuliyado sharci oo taageero; dhammaan xubnaha noocaas ah ee isku xariira waxaa loo yaqaanaa hal qoys.

**Dakhliga Qoyska:**

**<u>Waxaa Ku jira:</u>**

- Mushaaraadka guud iyo gunnooyinka kahor intaan wax lacag ah laga jarin
- Lacagaha banaan ee laga helo ganacsiyada aan ahayn beerta (lacagta uu qofku ka helo ganacsigiisa ama beer uu leeyahay ama kiraystay kahor marka la jaro lacagaha ganacsiga laga jarto ama qarashaadka beerta)
- Lacagta ay joogtada u bixiyaan social Security, gunnada hawlgabka, magdhawga shaqo la'aanta, magdhawga shaqaalaha, lacagaha shaqo joojinta ee sanduuqyada midawga, gunnooyinka dadka ciidanka usoo shaqeeyay
- Caawimaada dawlada ee ay ku jirto Caawimaada Ku meel gaarka ah ee la siiyo Qoysaska Danyarta ah, Kaalmada Kaabida Dakhliga, iyo lacagaha Caawimaada Guud
- Joornaatiga tababarka;
- Alimony, taageerada carruurta, iyo qoondooyinka qoyska milatariga ama taageerada kale ee joogtada ah ee uu bixiyo qof maqan oo qoyska kamid ah ama qof aan ku noolayn gurigga
- Lacagaha beeshinka ee shirkadaha gaarka loo leeyahay, beeshinka shaqaalaha dawlada, iyo caymiska tooska ah ama lacagaha heshiiska caymiska
- Saamiyada, dulsaarta, kirada, dhaxalka, ama lacagaha goos-gooska ah ee ka yimaada guryaha ama haayadaha kaydka
- Lacagta faa'iidada ah ee khamaarka ama bakhtiyaa-nasiibka

**<u>Kuma jirto:</u>**

- Faa'iidooyinka hantida
- Hanti kasta oo aan ma guurto ahayn, ayna ku jiraan lacagaha lagala baxo bangi ama lacagaha kasoo xarooda iibinta guri.
- Lacag celinta canshuurta
- Hadiyadaha, daymanka, iyo lacagaha laga helo dhaxalka

- Lacagta caymiska ee halka mar lagu siiyo ama magdhawga kale ee halka mar ee dhaawaca
- Gunnooyinka aan lacagta ahayn sida qaybta ay qarashka ka dhiibaan shirkada aad u shaqayso ama ururka shaqaalaha ee caymiska caafimaadka ama gunnooyinka kale ee shaqada la xariira
- Qiimaha cuntada iyo shidaalka lasoo saaray laguna isticmaalay beeraha iyo lacagta kale ee kirada ka timaada dhulka mulkiiluhu ku fadhiyo ee ka baxsan beerta ama guriga beerta
- Barnaamijyada gunnooyinka aan kaashka ahayn ee federaalka, ayna ku jiraan Medicare, Medicaid, Caawimaada Cuntada, qadada dugsiga, iyo caawimaada diirada

**Qof u qalma FAP:** Waa qof u qalma caawimaad dhaqaale sida ku cad FAP (ayadoon laga eegayn in qofku codsaday iyo in kale caawimaada lagu bixiyo FAP).

**Heerka Fakhriga Federaalka (FPL):** Waa tusmada Dakhliga Heerka Fakhriga Federaalka sida ay go'aamiso Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha ee Maraykanka ( United States Department of Health and Human Services) laguna daabacay Diiwaanka Federaalka.

**Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha:** Waa codsi lagu diray qaab waafaqsan hanaanka lagu cadeeyay Qaybta III ee Xeerkaan.

**Qarashaadka Guud:** Waa qiimaha buuxa ee isbitaalka, ee la dajiyay ee ku baxay daryeelka caafimaadka oo isbitaalku si siman oo midaysan uga qaadaayo bukaannada kahor intaysan codsan wax qarash dhaaf ah oo heshiis ku yimid, qiimo dhimis, ama lacago laga jarto.

**Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah:** Adeegyada caafimaadka ama agabka kuwaasoo:

- Uu amro dhakhtar kuna habboon muhiimna u ah astaamaha xanuunka, baarista, ama daawaynta caafimaadka iyo caafimaadka dhimirka, ayna ku jiraan qaar kamid ah adeegyada kahortaga
- Waxaa lagu bixiyaa baaritaanka ama daryeelka tooska ah iyo daawaynta caafimaadka ama caafimaadka dhimirka;
- Ay buuxinayaan heerarka shaqada wanaagsan ee caafimaadka ee gudaha bulshada caafimaadka iyo caafimaadka dhimirka ee aaga adeegga;
- Aan ahayn caadiyan wax uu doortay bukaanku ama dhakhtarku; iyo
- Ay yihiin heerka ugu habboon ama bixinta adeegga oo si amaan ah loo bixin karo ama, marka loo baahdo, sida uu go'aanshay dib u eegista hanaanka ka faa'iidaysiga.

**Guriga Qoysaska Badan:** Haddii guri ay dagan yihiin wax ka badan hal qoys iyo/ama wax ka badan hal qof oo aan qaraabo ahayn, tilmaamaha dakhliga ayaa loogu dabaqayaa si gaar ah qof kasta iyo/ama shaqsi kasta oo aan qoyska kamid ahayn, lagumana dabaqaayo dadka guriga jooga si guud.

**HABRAACA/HANAANKA**

**I. AQOONSIGA BUKAANNADA LAGA YAABO INAY U QALMAAN CAAWIMAADA**

**A.** Markay macquul tahay, kahor taariikhda adeegga la siinaayo bukaanka, CMH ayaa samayn doonta waraysiga kahor dhigista isbitaalka oo laga qaadaayo bukaanka, damaanad qaadaha, iyo/ama wakiilkiisa sharciga ah. Haddii aan la qaadi karin warasyiga kahor isbitaal dhigista, waraysigaan waa in la sameeyaa marka adeegga la samaynaayo ama sida ugu dhakhsaha badan xiligaas kadib marka bukaanka lacag badan lagu yeesho. Marka qofka xaalad degdeg ah loo keeno, qaababka kale ee qiimaynta lacag bixinta ee CMH waa inaan la samayn illaa daryeelka loo baahnaa la siiyo bukaanka. Xiliga warasyiga hore ee bukaanka, xogta soo socota waa in la aruurshaa:

- Xogta joogtada ah ee balaaran ee deegaanka qofka; iyo

- Xogta buuxda ee ku saabsan dhammaan caymiska jira ee qolyaha saddexaad.

**B.** Dhammaan bukaannada waxaa la siin doonaa fursad ay ku codsadaan caawimaad dhaqaale. Marka bukaan uu codsado caawimaad dhaqaale kadib markuu isbitaalka ka baxo, Wakiilka Koontada Bukaanka ayaa boosto ugu diraaya Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha bukaanka/masuulka bukaanka si uu buuxiyo.

**C.** Aqoonsiga bukaannada u qalmi kara caawimaada ayaa la samayn karaa xili kasta inta lagu jiro mudada codsiga.

**D.** La taliyaasha dhaqaalaha ayaa caadiyan la heli karaa inta lagu jiro saacadaha shaqada si ay u bixiyaan adeegyada soosocda:

- Aqoonsiga ilaha lacag bixinta ee suurtagalka ah sida caymiska daynta shilka ama COBRA.
- In laga baaro bukaannada caymis ay ka heli karaan gobalka, federaalka, ama barnaamijyada caawimaada ee maxaliga ah, ayna ku jirto caawimaada Dhaqaalaha ee isbitaalka.
- Waxay ka caawiyaan bukaanka codsashada caymiska caafimaadka ee federaalka ama gobalku maal gasho iyo barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha.
- Waxay sharaxaan su'aalo kasta oo dhaqaalaha la xariira.
- Waxay abuuraan heshiisyada lacag bixinta.
- Waxay bixiyaan qiyaasaadka qiimaha.
- Waxay bukaanka siiyaan biil sheey walba la gaar yeelay markay codsadaan.

**E.** CMH ayaa ku tiirsanaan karta xogta laga helo ilaha kale si loo go'aansho in qof uu u qalmo caawimaada.

**II. TALAABOOYIN SI WAYN LOOGU FAAFINAAYO XEERKA CAAWIMAADA DHAQAALAHA GUDAHA BULSHADA**

CMH iyo ururada xubnaha ka ah ayaa ku dhaqmi doonaa dhammaan sharciyada quseeya, xeerarka iyo qawaaniinta la xariira ogaysiinta bukaanka ee la xariira caawimaad adhaqaalaha, ayna ku jirana waxyaabaha soo socda:

**A.** Boorarka lasoo dhajiyo iyo ogaysiisyada gaarka ah ee ay ku jirto xogta ku saabsan helitaanka caawimaada Dhaqaalaha ayaa lagu dhajiyaa meelaha muhiimka ah ee dadku u wada jeedaan ee isbitaalka, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn meelaha soo socda:: Diiwaanka Dhexe/Gelitaanka Bukaanka, Aaga sugitaanka ee Qolka Xaalada Degdega ah, goobaha xarumaha Caafimaadka, qolalka sugitaanka ee dhakhtarka isbitaalka u shaqeeya, goobaha la taliyaasha dhaqaalaha iyo Xafiiska Ganacsiga.

**B.** Koobiyada waraaqaha ah ee Xeerkaan, Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, iyo xogta kooban ee luuqada fudud ku qoran ayaa laga heli doonaa goobaha ku qoran Qaybta A ee kore, waana la siin doonaa bukaannada ayadoo qayb ka ah hanaanka isbitaalka dhigista ama ka saarida.

**C.** Xogta, sida waraaqaha tilmaamaha, ayaa lagu dari doonaa sanduuqyada adeegyada/xogta ee bukaanka iyo/ama aagaga isqorista ee bukaanka iyo marka uu ku codsado khadka taleefanka, interneedka ama si toos ah.

**D.** Ogaysiis qeexan oo la xariira helitaanka caawimaada Dhaqaalaha, ayna ku jiraan lambarka taleefanka ee xafiiska isbitaalka ama waaxda siin karta xog ku saabsan Xeerkaan iyo hanaanka Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, ama ciwaanka url ka ama webka ee laga heli karo koobiyada Xeerkaan, iyo xogta kooban ee luuqada fudud ku qoran laga heli doono, ayaa lagu dari doonaa bayaanka biilka.

**E.** Dhammaan xogta bulshada iyo/ama foomamka la xariira bixinta caawimaada dhaqaalaha, ayna ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn, Xeerkaan, Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, iyo xogta kooban ee luuqada fudud ku qoran ee Xeerkaan, ayaa adeegsan doona luuqado ku habboon aaga adeegga ee

xarunta. Waxaa jira luuqado aasaasi ah oo aan ahayn Af-Ingiriis oo ay ku hadlaan wax kayar 1,000 qof ama 5% bushada isbitaalku u adeeggo, xogta dadwaynaha, foomamka iyo/ama boorka ayaa lagu qori doonaa luuqadahaas kale.

**F.** Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha, tilmaamaha, iyo xogta kooban ee luuqada fudud ayaa laga geli karaa https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/financial-assistance/

**G.** CMH waxay samayn doontaa dadaal macquul ah si ogaysiis afka ah loo siiyo qof loogana waramo Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee isbitaalka iyo xog ku saabsan sida loogu helo caawimaad hanaanka Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ugu yaraan 30 maalmood kahor bilaabida ECAs ka dhanka ah qofka.

**H.** Haddii waqti kamid ah Mudada Codsiga bukaanku muujiyo inuusan awoodin dhiibista qarashka, bukaanka ayaa loo sheegi doonaa helitaanka caawimaad dhaqaale waxaana la siin doonaa Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha. Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha iyo tilmaamaha waxaa laga heli karaa https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/financial-assistance/

**III. QAABKA CODSASHADA CAAWIMAADA DHAQAALAHA**

**A.** Bukaanku waa inuu helaa uuna buuxiyaa Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha oo qoraal ah uuna keenaa dhammaan xogta/dukumiintiyada kaabaaya ee loogu baahan yahay xaqiijinta u qalmida. Noocyada xogta/dukumiintiyada loogu baahan yahay inay kaabaan Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayaa ku qoran tilmaamaha Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha.

**B.** U qalmida la qiyaasay: Waa go'aamin bukaanka lagu qiyaaso inuu u qalmo caawimaada Dhaqaalaha ayadoo lagu salaynaayo sifooyinka loogu qalmo caawimaada ee dhaqaalaha iyo taariikhda:

- Qofku waxaa uu u qalmaa barnaamijyada gobalka qaarkood, tusaale, SNAP, TANF;
- Qofku waxaa uu hadda u qalmaa Medicaid, laakiin uma qalmin taariikhda adeegyada labaxshay;
- In qofku uu yahay bilaa hooy;
- In qofku jiran yahay uusana lahayn awood muuqata oo guryo ah oo uu ku bixin karo daymaha isbitaalka;
- In qofku u qalmo barnaamijyada Gobalka si uu caawimaad ugu helo Sharciga Magdhawga Dhibanayaasha Rabshada ama Sharciga Magdhawga Dhibanayaasha Weerarka Galmada.

**C.** Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha ayaa noqon doona diiwaan muujinaaya aqbalaada ama diidmada caawimaada dhaqaalaha.

**D.** Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha oo la aqbalay oo ka yimaada wakaalad kasta oo CMH kamid ah ayaa loo adeegsan doonaa in qiyaasiyan lagu go'aansho u qalmida muddo lix billood ah laga bilaabo taariikhda aqbalaada marka laga reebo haddii wax kamid ah kuwa soo socda ay quseeyaan:

- Helitaanka joogtada ah ee adeegyada bukaanka;
- Isbadelka dakhliga;
- Isbadelka tirada qoyska;
- Isbadel ku dhaca xaalada shaqada.

**E.** Shaqsiyaadka ayaa la xariiri kara mid kamid ah Isbitaallada CMH si xog dheeraad ah looga siiyo hanaanka Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha iyo caawimaad laga siiyo Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha.

**F.** Bukaannada doonaaya Daryeelka Caafimaadka Degdega ah: Isbitaallada CMH Hospitals ayaa siin doona, ayagoon cidna takoorayn, daryeelka xaalada Caafimaad ee Degdega ah (sida ku cad macnaha qaybta 1867 ee Sharciga Social Security (42 U.S.C 1395dd)) shaqsiyaadka ayadoon laga eegayn u

qalmidooda caawimaada Xeerkaan iyo sida uu amraayo Sharciga Daawaynta caafimaadka Degdega ah iyo Shaqaalaha Shaqaynaaya ("EMTALA"). Isbitaallada CMH ma samayn doonaan talaabooyin kasta kuwaasoo ka hor istaagaaya dadka inay dalbadaan daryeelka caafimaad ahaan degdega ah, sida in laga dalbado bukaanada inay baxshaan qarashka kahor intaan laga daawayn xaaladaha caafimaad ee degdega ah ama ogolaanshaha talaabooyinka lacag qaadista kuwaasoo carqaladaynaaya bixinta daryeelka, ayadoon la kala saarin xaaladaha, daryeelka degdega ah ee caafimaadka.

**IV. TALAABOOYINKA LACAG ARUURINTA EE QAYRU CAADIGA AH (ECAs)**

**A.** Shuruudaha guud kahor bilaabida ECAs: Isbitaallada CMH ma bilaabi karaan wax ECA ah ugu yaraan 120 maalmood laga bilaabo marka isbitaalka CMH uu soo saaray liiska biilka koobaad ee isbitaal ka saarida iyo ilaa qofka looga sheego jiritaanka caawimaada FAP. Waxaa intaas dheer, kahor intaan ECAs laga qaadin qof, isbitaallada CMH waa inay sameeyaan dadaallada macquulka ah ee lagu go'aaminaayo in qofku u qalmo caawimaada dhaqaalaha ee FAP si waafaqsan Qaybta 1 ee hoose. ECAs lama samayn karo haddii bukaanku sameeyo heshiis lacag bixin oo lagu qanco uuna la galo isbitaalka. Ugu danbayntii, kahor bilaabida ECA kasta, CFO ga ama wakiilkiisa waa inuu go'aanshaa in isbitaalku sameeyay dadaallo macquul ah oo lagu go'aaminaayo in qof uu u qalmo iyo in kale FAP uuna dhanka kale ku dhaqmay Xeerkaan. Wax ECA ah lama bilaabi karo kahor inta go'aanka noocaas ah uusan gaarin CFO ga ama wakiilkiisa.

**B.** Dadaalallada macquulka ah: Isbitaalka CMH ayaa loo aqoonsanayaa inuu sameeyay dadaallo macquul ah si uu u go'aansho in qof uu u qalmo caawimaad dhaqaale oo uu ku helo FAP haddii isbitaalka CMH uu sameeyo midkood: (i) uu go'aansho in qofku buuxiyay shuruudaha go'aaminta qiyaasta u qalmida; ama (ii) uu siiyo ogaysiis ku filan qof kana siiyo FAP uuna ka shaqeeyo codsi kasta oo FAP ah oo uu qofku soo gudbiyay (haddii codsigu buuxo iyo haddii kalaba).

- Si loo gaaro go'aaminta qiyaasta u qalmida, isbitaalku waa inuu go'aanshaa in qofku u qalmo caawimaada dhaqaalaha ayadoo lagu salaynaayo xog aan ahayn midda uu qofku bixiyay ama lagu saleeyay go'aaminta u qalmida kahor FAP.
- Si loo siiyo ogaysiis ku filan qofka kuna saabsan FAP, isbitaallada CMH waa inay u sheegaan qofka FAP ugu yaraan 30 maalmood kahor intaan la bilaabin hal ama ka badan ECAs ayadoo la siinaayo qofka ogaysiis qoraal ah kaasoo sheegaaya in caawimaad dhaqaale ay heli karaan dadka u qalma, cadaynaaha ECAs ka isbitaalka CMH doonaayo inuu qaado si uu lacagta u helo, uuna sheego waqtiga u cayiman ee gadaashiisa la bilaabaayo ECAs, taasoo aan waqtiga cayiman ka horayn karin 30 maalmood kadib marka ogaysiiska qoraalka ah la diray.
- Waa inuu xogta kooban ee luuqada fudud ee FAP kusoo daro lifaaqa ogaysiiska qoran.
- Inuu sameeyo dadaal macquul ah si uu afka uga sheego qofka xogta FAP iyo sida shaqsiga laga yaabo in uu ku helo caawimaaad laga siiyo codsiga FAP.

**C.** Habraacyada dheeraadka ah haddii codsiga FAP oo aan buuxin la diro: Marka lagu daro ku dhaqanka shuruudaha ogaysiiska ee kuqoran Qaybta A ee kore, Isbitaallada CMH waxaa inay shaqsiyaadka codsiga FAP ee kala dhiman soo dira siiyaan inta lagu jiro Muddada Codsiga ogaysiis ku saabsan sida loo buuxin karo codsiga FAP iyo fursada macquulka ah ee ay sidaas ku samayn karaan. Si loo buuxsho shuruudahaan, Isbitaallada CMH waa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Waa inay bilaabin, ama qaadin talaabo dheeraad ah oo la xariira ECAs horay loo bilaabay.
- Waa inay siiyaan qofka ogaysiis qoraal ah oo ay ku jirto xogta soo socota: qeexitaanka xogta iyo/ama dukumiintiyada ku jira FAP ama foomka codsiga FAP ee ay qasabka tahay in lasoo diro si loo dhamaystiro codsiga FAP.
- Xogta xariirka, ayna ku jirana lambarka taleefanka iyo goobta uu ku yaalo; ee: (i) xafiiska isbitaalka ama waaxda bixin karta xogta ku saabsan FAP; iyo (ii) midkood (a) xafiiska ama

waaxda isbitaalka ee bixin karta caawimaad ku aadan hanaanka codsiga FAP, ama (b) ugu yaraan hal urur oo khayri ah ama Wakaalad Dawladeed oo CMH u aqoonsatay il laga heli karo caawimaad ku aadan codsiyada FAP.

**D.** Habraacyada dheeraadka ah haddii codsiga FAP oo buuxa la diro: Marka lagu daro ku dhaqanka shuruudaha ogaysiiska ee ku qoran Qaybta A ee kore, isbitaallada CMH waa inay sameeyaan dhammaan waxyaabaha soo socda oo la xariira qofka gudbiya codsiga buuxa ee FAP inta lagu jiro Mudada Codsiga:

- Waa inay bilaabin, ama qaadin talaabo dheeraad ah oo la xariira ECAs horay loo bilaabay.
- Waa inay go'aanshaan in qofku u qalmo iyo in kale caawimaada Dhaqaalaha ee FAP.
- Waa inay u sheegaan qofka go'aanka u qalmida oo qoraal ah, ayna ku jirto caawimaada qofku u qalmo iyo aasaaska loo cuskaday u qalmida.
- Haddii qofka la go'aansho inuu u qalmo caawimaad dhaqaale oo uu ku helo FAP, isbitaalka CMH waa inuu qaadaa dhammaan talaabooyinka macquulka ah oo uu ku joojinaayo ECA kasta oo laga qaaday qofka si looga qaado lacagta daryeelka (tusaale, in meesha laga saaro xukun kasta, laga saaro damaanad ama hanti qaadasho kasta, meeshana laga saaro xogta xun ee lagu sheegay warbixinta daynta).

**E.** U gudbinta wakaalladaha dayn aruurinta: marka lagu daro ku dhaqanka shuruudaha guud ee ECAs ee lagu dayiyay Qaybta A ee kore, Isbitaallada CMH waa inay ku dhaqmaan shuruudaha soo socda ee dheeri ah markay lacag qof lagu leeyahay u gudbinayaan wakaaladaha ldaynta aruursha:

- Isbitaalka CMH waa inuu ka doonaa wakaaladaha dayn aruurinta inay keenaan xaqiijinta qoraalka ah ee wakaaladu ay ku dhaqmayso Sharciga Talaabooyinka Dayn Aruurinta Cadaalada ah iyo Ururka Dayn Aruurinta Maraykanka (ACA), Xeerarka Hufnaanta iyo Masuuliyada Xirfadeed.

**F.** U gudbinta wakaalladaha ka warbixiya dadka daynta qaba: marka lagu daro ku dhaqanka shuruudaha guud ee ECAs ee lagu dayiyay Qaybta A ee kore, Isbitaallada CMH waa inay ku dhaqmaan shuruudaha soo socda ee dheeraad ah markay warbixin u dirayaan wakaalad kasta oo daynta ka warbixinsa (tusaale, Transunion, Experian, iyo Equifax):

- Daymaha loo gudbiyo wakaalada dayn aruurinta ayaa lagu qori karaa wakaaladaha qaran ee daynta ka waranta haddii qofka lacagta lagu leeyahay uu ku fashilmo inuu lacagta oo buuxda iska dhiibo ama la sameeyo heshiis lacag bixin oo lagu qanco uuna la galo wakaalada dayn aruurinta.

## V. LIISKA ADEEG BIXIYAASHA SAMEEYA DARYEELKA DEGDEGA AH AMA DARYEELKA KALE EE CAAFIMAAD AHAAN MUHIIMKA AH

Lifaaqa webka oo laga helaayo Liiska Adeeg Bixiyaasha Caawimaada Dhaqaalaha ee CMH ayaa laga heli karaa:
https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/financial-assistance/
Boggaan waxaad ka helaysaa liiska adeeg bixiyaasha isbitaallada CMH oo Daryeelka degdeg a ama Caafimaad ahaan Muhiimka ah bixiya aana ku jirin Xeerkaan. CMH waxay si joogto ah u cusboonaysiisaa liiska adeeg bixiyaasheena aan shaqaalaha ahayn si loo xaqiijiyo in liisku yahay mid sax ah oo cusub. Hase yeeshee, waxaa jiri kara xiliyo aan la cusboonaysiin liiskaan si loogu daro adeeg bixiyaal cusub ama loo muujiyo isbadal ku yimid xaalada adeeg bixiye oo ku aadan inuu ku jiro ama uusan ku jirin Xeerkaan. CMH waxay ku talinaysaa in shaqsiyaadku la tashadaan la taliyahooda dhaqaalaha ee CMH markasta oo ay suurtagalayso si loo hubiyo xogta ku saabsan adeeg bixiye gaar ah ay si sax ugu jirto liiska.

**VI. WARBIXINTA IYO LA SOCOSHADA**

**A.** Liiska Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha kaasoo laga yaabo in warbixinno goos-goos ah lagu abuuro ayaa la hayn doonaa asagoo ka duwan caddaymaha kale ee dhaqaale ee loo baahan yahay.

**B.** Shaqada caawimaada Dhaqaalaha ayaa loosoo gudbin doonaa bulshada sanad kasta, ayadoo lagu salaynaayo qarashaadka la qiyaasay ee adeegyada.

**FIIROOYIN GAAR AH:**

**I. XADIDAADAHA:**

**A.** Xeerkaan waxa uu qabanayaa:

- Dadka dagan Maine ee qaata daryeelka degdega ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan Muhiimka ah sida lagu go'aansho fikirka caafimaadka ee dhakhtarka ayadoon laga eegayn xaalada dhaqaale ee bukaanka, iyo cidda buuxinaysa shuruudaha hoos ku qoran.
- Dadka aan daganayn Maine ee doonaaya daryeelka degdega ah buuxshana shuruudaha hoose ku qoran.

**B.** Caawimaada Dhaqaaluhu ma:

- Bixiso caymis caafimaad
- Badel uma noqoto ama ma kaabto caymiska caafimaadka
- Ma damaanad qaadayso gunnooyin
- Ma daboosho dhakhaatiirta daryeelka Caafimaadka ee aan CMH ka shaqayn
- Meesha kama saarto lacagaha qaybta ugu yar ee aad bixinayso ee sharciga ama sababaha caafimaad amrayaan (tusaale, barnaamijka caawimaada ee batterer; barnaamijka daawaynta maandooriyaasha)
- Ma doobo Qaliinka Ikhtiyaariga ah ee Qurxinta ama adeegyada aan buuxin baahida caafimaadka

**II. U QALMIDA CAAWIMAADA DHAQAALE EE 100% AH:**

**A.** Caawimaada Dhaqaalaha ee Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah ayay heli karaan dadka Dagan Maine ee:

- Aan haysan daboolida caymiska caafimaadka ama caymis bixinaaya keliya qayb kamid ah biilka; iyo
- Buuxinaaya shuruudaha dakhliga ee hoos ku qoran.

**B.** Caawimaada Dhaqaalaha ee Daryeelka Xaalada Degdega ah ayay heli karana dadka Dagan Maine iyo Kuwa aan Daganayn Maine ee:

- Aan haysan daboolida caymiska caafimaadka ama caymis bixinaaya keliya qayb kamid ah biilka; iyo
- Buuxinaaya shuruudaha dakhliga ee hoos ku qoran.

**C.** Isbitaallada CMH ayaa bixiya caawimaad dhaqaale oo 100% ah ayadoo lagu salaynaayo shuruudaha hoos lagu qeexay:

- Wadarta dakhliga waxay ka hoosaysaa ama la mid tahay 200% ee FPL.
- Bukaanku waa qof degen Maine oo qaata adeegyada Caafimaad ahaan ama Degdega ah ee soo baxda iyo agabka
- Bukaanku maaha qof degen Maine oo helaya Daryeeelka Gurmadka

    - Adeegyada ama agabka Caafimaad ahaan Muhiimka ah

• In dhammaan ilaha Lacagta baxsha ee Qolada Saddexaad ah wax laga waayo, ay ku jiraan inta la kharash gareeyay

D. CMH Hospitals waxay bixiyaan qayb ahaan qadar daryeel (bilaash ah ee dayreelka c ahaan bilaashka ah oo la mid noqon doona 100% ee kharashyada loo qalmo, oo lag AGB, laakiin aan siba uga yaraan doonin 50%)
   - Wadarta dhakhliga oo dhan waxay *ka badan tahay 200%* oo *ka yar tahay ama l tahay 250%* ee FPL
   - Bukaanku waa qof degen Maine oo qaata adeegyada Caafimaad ahaan ama De ee soo baxda iyo agabka
   - Bukaanku ***maaha*** qof degen Maine oo helaya Daryeeelka Gurmadka
   - Dhammaan ilaha Lacag bixiyaha ee Kale, ay ku jiraan dhammaan inta la kharash gareeyay, marka ay habboon tahay aanay waxba hadhin.

E. Ma jirto qof u qalma kaalmada dhaqaalaha oo lagu soo dalici doono kharash badan gurmadka ah ama haddii kale Daryeelka Caafimaad ahaan lama huraanka ah oo aan inta lagu xisaabiyay AGB

**Wixii Su'aalo a oo ku saabsan Caawimaada Dhaqaalaha ee Central Maine Healthcare, fadlan la xariir (207) 777-8050 ama webka oo ah**
**https://www.cmhc.org/patients-visitors/billing-financial-information/**.

**BAYAAN DIGNIIN AH**

Xaalado soo dariyay ayaa muhiim ka dhigi kara ka weecashada shuruudaha xeer. Waa la fahmayaa in xaalado degdeg ah imaan karaan, kuwaas oo u baahan xal degdeg ah. Marka loo baahdo, dukumiintiyada ku habboon waa in la abuuraa si loo taageero muhiimada weecashooyinkaas.

**TIXRAACYADA ISDHAAFKA AH**

Xeerka Biilka iyo Dayn Aruurinta ee Central Maine Healthcare

**TIXRAACYADA IYO ILAHA CADAYNTA**

Shuruudaha 501(c)(3) Isbitaallada ku jira Sharciga Daryeelka Qiimaha Jaban – Qaybta 501(r). (n.d.). Lagasoo xigtay Diseembar 16, 2019 https://www.irs.gov/charities-non-profits/charitable-organizations/requirements-for-501c3-hospitals-under-the-affordable-care-act-section-501r.

**XOGTA KOOBAN EE DIB U EEGISTA/ANSIXINTA**

| **ISBADELADA:** |
|---|
| |

| TAARIIKAHAH MURAAJACADA/DIB U EEGISTA: 11/20/2020<br>02/04/2022, 02/04/2022, 08/23/2023. 10/22/2025<br>(aan dib loo eegin) | |
|---|---|
| **LAAMAHA ANSIXINTA**: Golaha CMH, Gudigga Dhaqaalaha, Golaha Ku dhaqanka, Golaha Dib U eegista Xeerka, Golaha | **TAARIIKHDA AN SIXINTA: 4/1/2021** |